

Aagga Lagu ciyaaro ee Beerta Duwamish Waterway

Inta ka hartay Beerta Duwamish Waterway iyo aagga xeebta ayaa dib loo furi doonaa maadaama lagu sameeyay shaqo dheeraad ah oo ku saabsan dib u habbeynta deegaanka

Seattle Parks and Recreation (SPR, Beeraha iyo Madadaalada Seattle), [Ururka Beeraha Seattle](#) iyo Saaxiibada Duwamish Waterway Park, waxay fureen aagga lagu ciyaaro ee Beerta Duwamish Waterway, ee kutaala 7900 10th Ave. S ee kutaala South Park waxaa la furay dhammaadkii Agoosto. SPR waxay gateen 1.3-acre, qaybta ugu wayn beerta ee leh cagaarka ee degmada King kadib markii bulshadu la timid nidaam hantida guud si rasmi [looga dhigaayo](#) beerta xaafada kutaala gaar ahaan afka hore ee webiga. Qayb yar oo kamid ah aagga beerta waxaa iska leh Debada Seattle, laakiin waxay qayb ka ahayd beerta muddo sanado badan ah.

SPR waxay la shaqeysaa qandaraasle, Dekada Seattle, Washington State Department of Ecology (Waaxda Gobalka Washington ee Qaabilsan cilmiga deegaanka) (Cilmiga Deegaanka), iyo [Isbahaysiga Bulshada Duwamish Waterway](#) waxayna kala shaqeysaa baahiyaha dheeraadka ah ee dib u habbeynta deegaanka kahor inta aan la fuin qaybta hartay ee beerta. Shaqooyinka Beeraha iyo Madadaalada Seattle ee waqtii xaadirkaan waxaa kamid ah dib u casriyeyn lagu sameeyo beerta iyo qayb kamid ah ciida aan [habbooneyn](#) ee laga oggaaday intii u dhaxeysa 2014 iyo 2019 oo laga bixyo beerta. Kadib markii ciida laga saaray beerta, meesha ciida laga saaray waxaa lagu shubay ciid nadiif ah, caws, iyo/ama bacrimiyaal sidoo kale [tallaabooyinka la qaaday waxaa la ogeysiiyay Washington State Department of Ecology](#) (Cilmiga Deegaanka) ayadoo la adeegsanaayo Barnaamijka Nadiifinta deegaanka ee Mutadawacnimada ah. Kadib markii lala tashtay waaxda Cilmiga deegaanka iyo Isbahaysiga Bulshada Duwamish River, Beeraha iyo Madadaalada Seattle waxay caddeeyeen inay jiraan waxqabadyo dheeraad ah oo loo baahan yahay kahor inta aan la furin inta ka hartay beerta. Dhameystirka nadiifinta beerta waxaa qiimeyn ku sameyn doona Waaxda Cilmiga deegaanka oo hoos timaada Barnaamijka Nadiifinta Mutadawacnimada ah iyo Isbahaysiga Bulshada Duwamish River si loo hubiyo inaan [hiigsaneyno yoolalka bulshada](#). Inkastoo aan wali lagu dhawaaqin jadwalka nadiifinta, hadana SPR waxay ka shaqeyneysaa inay furto inta ka hartay beerta sida ugu dhaqsiyaha badan.

La shaqeynta SPR iyo Ururka Beeraha ee Seattle, Saaxiibada Beerta Duwamish Waterway waxay ururiyeen lacag ka badan \$1 milyan oo loogu talagalay in lagu dayactiro beerta waxayna bilaabeen dadaal ku saleysan dayactirka maadaama beertaan ay mudnaan sare u leedahay bulshada. Mashruuca ay maalgeliyeen ayna gacanta ku hayaan bulshada waxaa si taxadar leh loogu talagalay in lagu kordhiyo meelaha banaan ee lagu sameeyo madadaalada iyo bandhigiyada, iyo in la dhowro marinada webiga si loo abuuro doomaha gacanta lagu qaadi karo. SPR waxay dib u habbeynta ku sameysay beerta oo hadda laga helo aag cusub oo lagu ciyaaro, wado lagu socdo oo leh farshaxano ku taxan, qalab cusub oo beerta lagu rakibay oo leh miisas yaryar oo wax la saaran karo, hilib la solay, iyo sidoo kale meelo laga cabo biyo iyo aagga lagu dhaqdo lugaha. Shaqooyinka Barnaamijka Nadiifinta Mutadawacnimada ah ee uu wax oga qabanaayo meelaha beerta ee waxyeeladu soo gaartay waqtii xaadirkaan waxaa loo maalgeliyay si gooni ah.

Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan xaaladaha goobta la nadiifinaayo ayadoo la adeegsanayo Barnaamijka Nadiifinta Mutadawacnimada ah, eeg bogga webka waaxda cilmiga deegaanka ([Barta xogta laga helo \(wa.gov\)](#)).